# DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
# GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND

## WAX KA BEDDELKA XEERKA QAREENNADA PUNTLAND

**Garoowe, Diseembar, 2024**

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 25AAD | CADADKA 1AAD | TAARIIKH: 6/1/25 | Lam. 01 |
|---|---|---|---|

# FAAFINTA RASMIGA AH

# OFFICIAL GAZETTE

# الجريدة الرسمية

## wax-ka-bedelka Sharciga Qareenada Dowladda Puntland

| TUSMADA | |
|---|---|
| Qeybta 1aad | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**wax-ka-bedelka Sharciga Qareenada Dowladda Puntland** |
| Qeybta 2aad | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 3aad | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 4aad | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br><br>WAXBA MALEH |
| Qeybta 5aad | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br><br>WAXBA MALEH |

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

**Sharci Lr. 001 ee 6-da January 2025, kuna saabsan wax -ka-bedelka Sharciga Qareenada Dowladda Puntland.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80-aad farqadiisa 16-aad.

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/63/2024, kuna taariikhaysan 07-da Deseember 2024.

**Markuu Tixgeliyey:** Baahida loo qabo wax-ka-bedelka Sharciga Qareenada Dowladda Puntland.

**<u>Wuxuu soo saaray</u>**

**Sharciga soo socda:**

**Qodobka 1aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen wax-ka-bedelka Sharciga Qareenada Dowladda Puntland.

**Qodobka 2aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

**Qodobka 3aad**

Dhaqangalka Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

ولاية بونتلاند الصومالية
مكتب الرئيس
Office of the President
Puntland State of Somalia

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILLADA

ولاية بو نت لاند الصومال
مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

Tix:-XGGW/DPL/63/2024 Garoowe, Sabti, Taariikh: - 07/12/2024

Ku:- Madaxweynaha Dawladda Puntland Garoowe

Ujeeddo:- **ANSIXINTA WAX-KA-BEDELKA XEERKA QAREENNADA DAWLADDA PUNTLAND**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -**

**MARKUU ARKAY:-** Qodobada **60-aad (1), 64-aad (1), 68-aad(t)** iyo **70-aad (1)** ee Dastuurka Dawladda Puntland.

**MARKUU ARKAY:-** Qodobada **2-aad (1), 3-aad (1), 57-aad(2)** iyo **58-aad** ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada Dawladda Puntland.

**MARKUU ARKAY:-** Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: **MW/DPS/126/2023 ee July 22, 2023**, kuna saabsan Wax-ka-bedelka Xeerka Qareennada Puntland.

**MARKUU TIX-GELIYEY: -** Baahida loo qabo Wax-ka-bedelka Iyo Kaabista Xeerka Qareennada Puntland.

**MARKUU DHEGEYSTEY: -** Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga **55-aad**, fadhigiisii **11-aad** ee **12/11/2024** cod gacanta tag ah ku Ansixiyeen wax-ka-bedelka Xeerka Qareennada Puntland. Guntanka fadhiga oo ahaa **(36)** Mudane, waxaa ugu codeeyey oggol **(34)** Mudane, Diidmo majirin, halka ay ka aamuseen **(2)** Mudane.

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Wax-ka-bedelka Xeerka Qareennada Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Cabdirisaaq Axmed Siciid**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILADA DAWLADDA PUNTLAND
OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

# Tusmo                                                                                    Bogga


CUTUBKA 1AAD ........ 1
QODOBO GUUD ........ 1
Qodobka 1-aad ........ 1
Eray Bixinta Xeerka ........ 1
Qodobka 2-aad ........ 2
Magaca Xeerka ........ 2
Qodobka 3-aad ........ 2
Baaxadda Xeerka ........ 2
Qodobka 4-aad ........ 2
Ujeeddada Xeerka ........ 2
Qodobka 5-aad ........ 2
Mabaadi'da Xeerka ........ 2
CUTUBKA 2-AAD ........ 3
QAREEN ........ 3
Qodobka 6-aad ........ 3
Mihnadda Qareennimo ........ 3
Qodobka 7-aad ........ 4
Xadeynta Marxaladaha Qareenka ........ 4
Qodobka 8-aad ........ 4
Waajibaadka Qareenka ........ 4
Qodobka 9-aad ........ 6
Xushmadda Qareenka ........ 6
Qodobka 10-aad ........ 6
Madaxbannaanida Qareenka ........ 6
Qodobka 11-aad ........ 7
Waxyaabaha ka Reebban Qareenka ........ 7
Qodobka 12-aad ........ 8
Nootaayo ........ 8
Qodobka 13-aad ........ 8
Qareenka Shisheeye ........ 8
Qodobka 14-aad ........ 8


GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

Dhaarta Qareenka ........ 8
CUTUBKA 3-AAD ........ 9
GUDDIGA ANSHAXMARINTA IYO ........ 9
RUQSAD BIXINTA QAREENNADA ........ 9
Qodobka 15-aad ........ 9
Dhismaha Guddiga ........ 9
Qodobka 16-aad ........ 9
Waajibaadka Guddiga ........ 9
Qodobka 17-aad ........ 9
Shuruudaha Diiwaan-Gelinta Qareenka ........ 9
Qodobka 18-aad ........ 10
Ruqsad Bixinta ........ 10
Qodobka 19-aad ........ 11
Cusboonaysiinta Ruqsadda ........ 11
Qodobka 20-aad ........ 11
Luminta Ruqsadda Qareennimo ........ 11
CUTUBKA 4-AAD ........ 12
ANSHAX-MARINTA ........ 12
Qodobka 21-aad ........ 12
Anshax-marinta Qareenka ........ 12
CUTUBKA 5AAD ........ 14
URURKA QAREENNADA ........ 14
Qodobka 22-aad ........ 14
Shuruudaha Xubinnimada Ururka ........ 14
Qodobka 23-aad ........ 14
Waajibaadka Xubnaha Ururka ........ 14
Qodobka 24-aad ........ 14
Xuquuqda Xubnaha Ururka ........ 14
Qodobka 25-aad ........ 15
Waayidda Xubinnimada Ururka ........ 15
Qodobka 26-aad ........ 15
Doorashada Ururka ........ 15
Qodobka 27-aad ........ 15




GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qaab Dhismeedka Ururka ........ 15
Qodobka 28-aad ........ 15
Shirkad Sharci ........ 15
Qodobka 29-aad ........ 16
Waajibaadka Shirkdaha Sharciga/ Qareenno ........ 16
CUTUBKA 6-AAD ........ 16
QODOBBO GUUD ........ 16
Qodobka 30-aad ........ 16
Fal Dambiyeed ........ 16
Qodobka 31-aad ........ 17
Ruqsadadaha La Bixiyey wax-ka-beddelka Xeerkan ka hor ........ 17
Qodobka 32-aad ........ 17
Xallinta Khilaafaadka Ururka ........ 17
Qodobka 33-aad ........ 17
Xeer-Nidaamiye ........ 17
Qodobka 34-aad ........ 18
Burin ........ 18
Qodobka 35-aad ........ 18
Dhaqan-Galka Xeerka ........ 18



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

**CUTUBKA 1AAD**

**QODOBO GUUD**

## Qodobka 1-aad

## Eray Bixinta Xeerka

Xeerkan gudihiisa haddii aan si kale loo fasirin, ereyada soo socda waxaa micnahoodu noqonayaa sidan;-

| L.r | Ereyga | Macnaha |
|---|---|---|
| 1. | **Dawlad** | Waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed. |
| 2. | **Dastuur** | Waxaa loola jeedaa Dastuurka Dawladda Puntland. |
| 3. | **Puntlander** | Waxaa loola jeedaa dadka Puntland u dhashay ama Puntland-nimada ku helay sifo sharci ah, sida ku cad Dastuurka Puntland. |
| 4. | **Maxkamad** | Waxaa loola jeedaa Maxkamadaha Puntland sida ku cad Dastuurka Dawladda Puntland. |
| 5. | **Xeer** | Waxaa loola jeeda Xeerka Qareennada Dawladda Puntland. |
| 6. | **Wasaarad** | Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta ee Dawladda Puntland. |
| 7. | **Wasiir** | Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta ee Dawladda Puntland. |
| 8. | **Qareen** | Waxaa loola jeedaa Sharci-yaqaan ku hawl-gala mihnadda qareennimo, kana diiwaan-gashan Guddiga Diiwaan-Gelinta iyo Bixinta Ruqsadda Qareennimo, kuna qoran diiwaanka Qareennada ama qareen dawladeed oo sharci gaar ah ku magacaaban. |
| 9. | **Agaasime** | Waxaa loola jeedaa Agaasimaha guud ee Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta ee Dawladda Puntland. |
| 10. | **Sharci-yaqaan** | Waxaa loola jeedaa qof haysta shahaado Sharciga/Qaanuunka (LL.B) oo la aqoonsan yahay. |
| 11. | **Ruqsad** | Waxaa loola jeedaa shahaadada caddeynaysa oggolaanshaha ku shaqeysiga Mihnadda Qareennimada ee ku tilmaaman Xeerkan. |



QAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

| | | |
|---|---|---|
| **12.** | **Urur** | Waxaa loola jeedaa Ururka Qareennada Puntland. |
| **13.** | **Xushmad** | Waxaa loola jeedaa khidmadda iyo kharashka lacageed ee uu bixiyo macmiilku oo la siiyo Qareenka. |
| **14.** | **Macmiil** | Waxaa loola jeedaa qof kasta oo Qareen u idmada inuu u qabto adeeg Sharciyeed ama difaacid, ha ahaado qof caadi ah, wakiil, shirkad ama hay'ad kasta oo leh shakhsiyad qaanuuneed. |
| **15.** | **Qareen shisheeye** | Waxaa loola jeedaa qareen aan u dhalan dalka Soomaaliya ama aan haysan dhalasho Soomaali ah. |
| **16.** | **Layli qareen** | Waa qof haysta shahaado sharci oo ku jira tababbar tijaabo qareennimo muddo hal (1) sanno ah. |

## Qodobka 2-aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Qareennada Dawladda Puntland.

## Qodobka 3-aad
## Baaxadda Xeerka

Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa Qareennada ka hawl-gala deegaannada Puntland iyo cid kasta oo shaqo qareennimo ka qabanaysa dhulka Puntland.

## Qodobka 4-aad
## Ujeeddada Xeerka

1. Nidaaminta shaqo hawleedka Mihnadda Qareenimada Dawladda Puntland.
2. Hubinta sarraynta sharciga, xoojinta caddaaladda iyo dammaanad-qaadka difaaca xuquuqda dadweynaha.
3. Ilaalinta madax-bannaanida Mihnadda shaqo ee Qareennada.

## Qodobka 5-aad
## Mabaadi'da Xeerka

1. Sarraynta Shareecadda Islaamka waxaa reebban xeer kasta oo ka soo horjeeda, si waafaqsan Dastuurka Dawladda Puntland.



XAAFAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

2. Dhiirigelinta xuquuqda aadamaha, Sarraynta Sharciga, caddaaladda iyo hannaan ku dhisan isla-xisaabtan daah-furnaan.
3. Xaqa ku shaqaysiga Mihnadda Qareennimo.
4. Xaqa dacwadda iyo is-difaaca sida ku cad Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa 25-aad.

## CUTUBKA 2-AAD
## QAREEN
## Qodobka 6-aad
## Mihnadda Qareennimo

1. Mihnadda qareennimadu waa kala qayb-qaadashada garsoorka xaqiijinta Caddaaladda, Garsooridda xaqa iyo xoojinta sarreynta qaanuunka iyo damaanad-qaadka xaqa shakhsiga iyo dhowrista xorriyaddiisa.
2. Xirfadda qareennimo waxaa ku shaqaysan kara oo kaliya Sharci-yaqaan magaciisa lagu qoray Diiwaanka Qareennadda.
3. Sharci yaqaannada u shaqeeya Shirkadaha gaarka loo leeyahay, Hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ah qaab la talin sharci ah, ama shaqo la xiriirta sharciga, waxaa la siin karaa Ruqsadda Qareennimo, waxayna ka qareemi karaan maxkamadaha hortooda.
4. Ruqsadda qareennimo lama siin karo sharciyaqaan ka mid ah:-
   - b. Golaha Wakiillada.
   - t. Golaha Xukuumadda.
   - j. Golaha Garsoorka.
   - x. Goleyaasha Deegaanka.
   - kh. Shaqaalaha Dawladda.
   - d. Ciidamada qalabka sida, iyo
   - r. Danjirayaasha ama Diplomaasiyiinta.
5. Qareenku wuxuu ku shaqaysan karaa xirfaddiisa isaga oo kaligiis ah ama ay weheliyaan qareenno kale si qaab shirkadeed ah.



XEER ILAALIYAHA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 7-aad
## Xadeynta Marxaladaha Qareenka

1. Sharciyaqaanka raba inuu qareen noqdo waa inuu soo qaatay tababar qareen muddo hal (1) sanno, tababarka tijaabada qareennimo, waxaa bixin kara oo kaliya shirkad qareenno oo ka diiwaan-gashan Wasaaradda Caddaaladda.
2. Qareenku markuu dhammaysto tababarka, helana ruqsada qareennimo wuxuu ka doodi karaa Maxkamadaha Darajada koowaad iyo Rafcaanka .
3. Maxakamadda Sare, Maxkamadda Dastuuriga ah iyo Maxkamadda Ciidamada Qalabka-sida, waxaa ka doodi kara oo kaliya qareen ka soo shaqeeyey Maxkamadaha Darajada koowaad iyo labaad muddo aan ka yarayn labo (2) sanno.
4. Qareenka tababarka tijaabada ku jira ma furan karo xafiis u gaar ah muddada uu tababarka tijaabada ah ku jiro.

## Qodobka 8-aad
## Waajibaadka Qareenka

Waajibaadka qareenku waa:-

1. Inuu dhawro Shareecadda Islaamka, Dastuurka, Xeerkan iyo shuruucda kale ee Dalka.
2. Inuu si daacadnimo iyo xil kasnimo ku salaysan u guto xilkiisa matalaad ee ka saaran muwakiliintiisa uu difaacayo, isla markaana ugu adeego dadka uu wakiilka ka yahay si hufan oo ku qotonta xaq iyo caddaalad.
3. Inuu talo sharci oo meel mar ah siiyo dadka iyo hay'adaha uu difaacayo ama wakiilka u yahay, si ay u helaan xuquuqdooda sida ugu wanaagsan ee dantoodu ku jirto, waafaqasanna shuruucda Puntland.
4. Inuu ku dedaalo in heshiis laga dhex dhaliyo dhinacyada dacwadu ka dhexayso, haddii ay suurta-gal tahay, ka hor inta aan la gaarin in dacwada lagu dhammeeyo maxkamadaha hortooda, si looga baaqdo waqtiga badan ee ay dacwadu qaadanayso.
5. Inuu dhawro anshaxa iyo asluubta mihnadeed.
6. Inuu bixiyo canshuurta iyo khidmadaha ku waajibay si waafaqsan Xeerkan iyo shuruucda kale ee Puntland.



XAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

7. Inuu dhawro ama ilaaliyo xogaha iyo macluumaadka qarsoodiga u ah muwakiliinta (Idmadayaasha) si waafaqsan mihnadda qareennimo.
8. In aanu la wadaagin cid kale xogaha & macluumaadka ay is dhaafsadaan Qareenkan iyo macmiilka, marka laga reebo in xogahaas ama macluumaadkaas ay lid ku yihiin Amniga iyo jiritaanka Dawladda Puntland.
9. In aanu kula talin ama ku dhiiri-galin muwakiliinta inay ku kacaan ama sameeyaan fal-dembiyeed ama fal sharci darro oo lid ku ah qawaaniinta Puntland, si loogu gaaro dano gaar ahaaneed.
10. Xafiiska qareennada ama shirkad qareenno kasta waxaa xil ka saaran yahay ilaalinta iyo dhawridda xogta & macluumaadka qarsoodiga u ah muwakiliinta marka laga reebo habraaca lagu xusay Farqada 8-aad ee isla qodobkan.
11. Inuu gacan ka gaysto sidii runta looga gaari lahaa dacwadaha, Isla markaana uu ku kaalmeeyo Maxkamadaha hab-sami-u-gudashada xilkooda si ay ku jirto madax-bannaani, danta caddaaladda iyo sarraynta sharciga.
12. Inuu ka caawiyo ama ka gacansiiyo Maxkamadaha iyo xafiisyada kale ee Garsoorka fasiraadda sharciga, marka ay hay'adaasi si rasmi ah u waydiistaan hawl ku aaddan arrintaas, haddii aysan jirin wax caqabado ama cudurdaar oo la aqbali karo.
13. Inuu anshax wanaagsan, ixtiraam iyo xushmad kula dhaqmo Garsoorayaasha iyo hawl-wadeennada Maxkamadaha, Xeer-ilaaliyayaasha, Qareennada kale, dhinacyada dacwaduhu ka dhexeeyaan iyo markhaatiyada ay maxkamaddu u yeerto.
14. Inuu u hoggaansamo Xeerka Ururka Qareennada iyo anshaxa mihnada Qareennimo.
15. In uu ka qayb galo kulamada Ururka, gutana waajibaadka iyo xilka ka saaran Ururka iyo inuu si firfircooni leh u fuliyo hawlaha sida gaar ahaaneed loogu idmaday.
16. Haddii Qareenka xushmadiisa/khidmadiisa la siiyey inta dacwada maxkamadu socoto oo uu ka baxo heshiiskii uu ku difaacayey macmiilka ama idmadaha waa in uu ku wargeliyaa wakhti ku habboon macmiilka iyo maxkamadda isagoo u celinaya dhammaan kharashaadkii iyo wax walbo uu

ku helay dacwadaas, haddii aan xushmadiisa/khidmadiisa la siin waa in uu wakhti habboon si qoraal ah ugu gudbiyo macmiilka ama idmadaha iyo Maxkamadda.

## Qodobka 9-aad
## Xushmadda Qareenka

1. Xushmadda Qareenku qaadanayo waxaa gundhig u ah hadba heshiiska dhex mara Qareenka iyo muwakilkiisa, waana in lagu caddeeyo heshiiska nooca iyo heerka ay tahay dacwaddu, heshiiska dhinacyadu wuxuu ku eg-yahay Darajada Maxkamadeed ee heshiiska lagu gaaray ama lagu saleeyey.
2. Haddii uu Qareenku ka baxo dacwadda sabab la'aan waa in uu u celiyaa macmiilka ama idmadaha lacagtii uu xushmad/khidmad ahaanta horay uga qaatay, isla markaana siiyaa mag-dhaw, haddii ay waxyeello ka soo gaartay macmiilkiisa dacwada uu ka baxay qareenku.
3. Haddii macmiilka ama idmadaha uu qabsado ama la heshiiyo Qareen cusub, iyadoo heshiiskii Qareenkii hore uu weli taagan yahay, heshiiska Qareenka cusub ma saameynayo Qareenkii hore, xaqna looguma laha in uu celiyo xushmadii/khidmadii lagula heshiiyey, maadaama uu ku taagan-yahay heshiiskii hore.
4. Haddii aan horey loogu heshiin xushmadda qareenka, iskuna afgaran-waayaan qareenka iyo macmiilka, waxaa xushmada qareenka qiimaynaysa go'aanna ka gaareysa maxkamadda awoodda u leh, iyadoo tix-gelinaysa muddada dacwaddu socotay, qoraallada qareenku qoray ee galka dacwadda ku jira, khasaaraha ama faa'iidada soo gaadhay macmiilka.

## Qodobka 10-aad
## Madaxbannaanida Qareenka

1. Qareenka laguma xiri karo tuhun, xoriyaddiisa qofnimana ciriiri lama galin karo, haddii aan loogu imaan isagoo dambi faraha kula jira.
2. Tuhun laguma baari karo Qareenka, xafiiskiisa, gurigiisa, Qoraalladiisa iyo xiriirkiisa is-gaarsiineed sabab ku saabsan fal ka dhashay Anshax-marin, haddii aan oggolaansho laga haysan Guddiga ruqsad bixinta iyo Anshax-



XAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

marinta Qareennada.

3. Qareenka laguma dacweyn karo dacwad muwakil, wuxuuna leeyahay madaxbannaani shaqo oo aan loogu raacayn hadallada uu ugu dhawaaqay si niyad sami ah inta hawsha dacwadu socoto, haddii aysan jirin xil gudasho-xumo ama anshax-xumo baahsan.
4. Qareenku wuxuu xaq u leeyahay in uu gaaro ama u tago, wakaaladna ka soo qorto qof wakiishay oo xoriyadda laga qaaday, sida muwakiliinta ku xiran saldhigyada booliiska ama xabsiyada, sidoo kale wuxuu qareenku xaq u leeyahay in uu helo fursad iyo wakhti ku filan oo uu kula xiriiro, isla markaana uu macluumaad uga qorto si uu ugu diyaar-garoobo difaaca sharci ee uu u baahan yahay qofkaas uu wakiilka u yahay.
5. Wuxuu qareenku xaq u leeyahay helitaanka macluumaadka ay hayaan booliiska, xeer-ilaalinta, qareennada dhinaca kale iyo Hay'adaha Maamulka ee lidka ku ah qofka wakiilka ka yahay.

## Qodobka 11-aad
## Waxyaabaha ka Reebban Qareenka

1. Qareenka ku hawl-gala mihnadda qareennimo waxaa ka reebban:-
   b. Inuu ka raadiyo muwakiliinta arin wax u dhimaya sharafta iyo karaamada mihnadda qareenimada ama uu dhawri waayo anshax-wanaagga looga baahan yahay.
   t. Inuu dayaco, lunsado ama musuq-maasuqo hantida muwakiliinta uu wakiilka ka yahay ama difaacayo.
   j. Inuu ka tanaasulo ama ka baxo difaacidda muwakiliinta ama idmadaha sabab iyo cudurdaar la'aan.
   x. Inuu ku shaqeeyo qareenimo isagoo ka tirsan shaqaalaha Rayidka ah ee Dawlada ama ururrada kale ee dawliga ah ama dadka lagu tilmaamay Qodobka 6-aad farqadiisa 5-aad.
   kh. Inuu ku kaco xil-gudasho xumo ama anshax-xumo waxyeello u gaysan karta xilka ka saaran u adeegga macaamiisha.
   d. Inuu ku kaco ama iska dhowri waayo masaalixda iska hor-imanaysa ee saamaynta ku leh u Adeegga muwakiliinta.



XAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 12-aad
## Nootaayo

1. Diiwaanka qareennada waxaa lagu qori karaa nootaalaha buuxiya shuruudaha diiwaan-gelinta qareenka ee ku xusan Qodobka 17-aad ee isla xeerkan haddii uu codsado isla markaasna ka tanaasulay kana baxay shaqadii nootaayonimada oo uu horay u hayey.
2. Qareen waa la siin karaa ruqsadda nootaayonimada, haddii uu buuxiyo shuruudaha looga baahan yahay xilkaas ee uu qeexayo Xeerka Nootaayada Puntland, isla markaasna uu ka baxo shaqada qareennimada.

## Qodobka 13-aad
## Qareenka Shisheeye

1. Qareenka u dhashay dal Shisheeye wuu ka doodi karaa Maxkamadaha dawladda Puntland marka ay jiraan dacwado ay dhinac ka yihiin dad ajnabi ah.
2. Qareenka shisheeye waa in uu oggolaansho ka helo Guddiga ruqsad bixinta iyo anshaxmarinta qareennada.
3. Qareenka shisheeye waa in shuruucda dalkiisu u oggoshahay in Qareennada Soomaaliyeed ka doodi karaan Maxkamadaha dalkiisa.

## Qodobka 14-aad
## Dhaarta Qareenka

Qareenku wuxuu ku hor dhaaranayaa Maxkamadda Sare ee Dawladda Puntland kadib Marka uu imtixaanka ka gudbo, waxuuna oranayaa dhaarta soo socota:-
"Waxaan ku dhaaranayaa Magaca Alle (sw) inaan u guto xirfaddeyda qareennimo, difaac iyo talo-siin, si waafaqsan shareecada Islaamka, shuruucda dalka, sharafta, madax-bannaanidda, karaamada aadanaha, sidoo kalena dhawro anshaxa xirfadeed ee qareenka, in aan xafido sirta xirfadeed, inaan hagar-la'aan ugu adeego danaha qofka ama dadka ii wakiisha iyo danta guud ee caddaaladda dalka".



QAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

# CUTUBKA 3-AAD
# GUDDIGA ANSHAXMARINTA IYO RUQSAD BIXINTA QAREENNADA

## Qodobka 15-aad
## Dhismaha Guddiga

1. Xeerku wuxuu dhisayaa Guddiga Ruqsad bixinta iyo Anshaxmarinta Qareennada.
2. Guddigan wuxuu ka kooban-yahay todoba (7) xubnood oo kala ah:-
   - b. Garsoore ka tirsan Maxkamadda Sare iyo Xoghayaha Golaha Garsoorka oo uu soo magacaabo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.
   - t. Xubin ka tirsan Wasaaradda Caddaaladda oo wasiirku Magacaabayo, ahna Agaasimaha Waaxda Garsoorka ama Sharciyaqaan Wasaaradda ka tirsan
   - j. Gudoomiyaha Ururka Qareennada
   - x. Laba (2) xubnood oo ka socda Ururka Qareennada oo Guddoomiyaha ururku soo magacaabo.

   Kh. Difaacaha Xuquuqul Aadanaha ama xubin uu soo magacaabayo.
3. Garsooraha Maxkamadda Sare ayaa ah Guddoomiyaha Guddiga.

## Qodobka 16-aad
## Waajibaadka Guddiga

1. Qiimaynta iyo xaqiijinta dukumintiyada qofka raba ruqsadda qareenimo.
2. Diiwaan-gelinta iyo oggolaanshaha galista imtixaanka qareenimo qof kasta oo buuxiyey shuruudaha ku xusan Qodobka 17-aad ee xeerkan.
3. Diyaarinta iyo qaadista imtixaanka qareennada.
4. Xafididda diiwaannada, dukumentiyada iyo qoraallada kale ee qareennada.
5. Anshax marinta qareennadda.
6. Samaynta xeer-hoosaadka Guddiga.

## Qodobka 17-aad
## Shuruudaha Diiwaan-Gelinta Qareenka

1- Guddiga ruqsad bixinta iyo anshax marinta Qareennimo wuxuu diwaangelinayaa sharciyaqaan kasta oo buuxiya shuruudaha soo socda:-

b. Inuu yahay muwaadin Soomaaliyeed.
t. Inaan da'diisu ka yarayn labaatan iyo saddex (23) sano, maskax-ahaana caafimaad qabo.
j. Inuu jaamacad la aqoonsan yahay ka haysto shahaado Sharci (Shareeco ama Qaanuun).
x. Inuu soo gudbiyo codsi qoraal ah, shahaadada jaamacadda, caddeynta darajo-qoraaleedka waxbarashada iyo afar sawir oo kurka ah.
kh. Inuu soo qaatay tababar qareenimo muddo aan ka yarayn hal (1) sano.
d. Inaan xukun ciqaab Maxkamadeed oo kama dambaysa ku dhicin shantii (5) sano ee ugu dambaysay.
r. Inuu bixiyey lacagta xubinnimada Ururka Qareennada muddadii uu ka diiwaan-gashanaa.
s. Inuu bixiyey khidmada diiwaan-gelinta ee Guddiga oo dhan toban ($10) doolar ama Sh.So u dhigma.

## Qodobka 18-aad
## Ruqsad Bixinta

1. Guddigu markuu ku qanco codsadaha buuxiyey shuruudaha ku xusan Qodobka 17-aad ee xeerka waxay imtixaanka qareennimo ku diyaarinayaan muddo (14) cisho gudahood ah.
2. Guddigu waxay natiijada imtixaanka ku shaacinayaan muddo 7 cisho gudahood ah.
3. Qofka ku guulaysta imtixaanka qareenimo waxaa lagu qorayaa Diiwaanka qareenada, ka dib marka uu maro dhaarta ku xusan Qodobka 14-aad, waxaana lagu kaydinayaa Xafiiska Ururka Qareenada iyo Maxkamadda Sare.
4. Guddoomiyaha Maxkamadda Sare marka uu helo natiijada imtixaanka wuxuu ku soo saarayaa ruqsad qareenimo muddo afar iyo tobbon (14) cisho gudohood ah.
5. Imtixaanka Ruqsadda Qareennimadda waxaa laga dhaafayaa dadka soo socda:-
   b. Qofka haysta shahaadada Sharci ee diktoorada (LLD/PhD) lehna khibrad ku filan oo dhanka sharciga ah.
   t. Bare Jaamacadeed sharci muddo shan (5) sanno ah, isla markaana haystay



XAFIISKA QAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

muddadaas shahaado Sharci oo heerka labaad ah.

j. Qof muddo shan (5) sano ah ku shaqaynayay sharciga isaga oo ka hawl-galayey hay'ad dawladeed, kuwo Caalami ah iyo kuwa maxalliga ah, haystay mudadaas shahaado Sharci oo la aqoonsan yahay.

x. Qof ku shaqeeyey Xeer-ilaalin ama Garsoore muddo aan ka yarayn saddex (3) sano, haystana shahaado Sharci oo la aqoonsan yahey.

6. Dadka laga dhaafay imtixaanka waxaa looga baahan yahay in ay caddeymo sugan kala yimaadaan hay'adaha ay la soo shaqeeyeen, una soo gudbiyaan Guddiga.
7. Qiimaha ruqsadu waa Labo boqol ($200) oo doolar, cusboonaysiintuna waa Boqol ($100) doolar ama Sh.So u dhigma , Khidmadaas waxaa lagu shubayaa khasnadda Dawladda.

## Qodobka 19-aad
## Cusboonaysiinta Ruqsadda

1. Ruqsadda qareenimo waxaa la cusboonaysiinayaa sannad kasta.
2. Qareenna ma shaqayn karo haddii uusan cusboonaysiisan Ruqsaddiisa.
3. Si loogu cusboonaysiiyo Ruqsadda, Qareenka shaqeeya waa inuu soo gudbiyaa:-

   b. Codsiga cusboonaysiinta iyo nuqulka Ruqsaddii hore.

   t. Caddeynta bixinta khidmada Ruqsad cusboonaysiinta.

   j. Caddeynta bixinta lacagta xubinnimada Ururka.

## Qodobka 20-aad
## Luminta Ruqsadda Qareennimo

1. Qareenku wuxuu ku waayi karaa ama ku lumin karaa Ruqsadda qareennimada:-

   b. Haddii Maxkamadi ku rido xukun ciqaabeed oo kama dambays ah.

   t. Haddii ay caddaato inuu khiyaamo iyo been ku helay ruqsadda qareenimo.

   j. Haddii uu gudan-waayo shaqadiisa qareennimo sababo la xiriira caafimaad-darro xagga maskaxda ama jirka ah.

   x. Haddii uu ka tanaasulo mihnaddiisa qareennimo.

   kh. Haddii uu ka mid noqdo Hay'adaha lagu sheegay Qodobka 6-aad Faqradiisa 4-aad.

   d. Haddii uu la yimaado wax ka hor imaanaya Diinta Islaamka.



XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND / STATE GENERAL SOLICITOR

# CUTUBKA 4-AAD
# ANSHAX-MARINTA
## Qodobka 21-aad
## Anshax-marinta Qareenka

1. Hab dhaqannada uu ku kaco qareeno ee uu ku mudanayo tallaabooyinka anshax-marineed waxaa ka mid ah:-
   - b. Haddii uu faafiyo xog ku saabsan dacwadda uu ka helay qofka uu difaacayo oo dhibaato u keenaysa danta qofka uu Qareenka u yahay.
   - t. Haddii uu abaalgud hawleed ka qaato darafka kale ee dacwadda uga soo horjeeda macmiilkiisa.
   - j. Haddii uu u soo qaado ama qeyb ka noqdo si toosan ama si dadban, ama isku-dayo inuu soo qaado laaluush Garsoore kamid ah Garsooreyaasha ku lug leh ama ku lug lahaan kara dacwadda.
   - x. Haddii uu ku socdo talooyin ka baxsan muwakilkiisa oo xiriir la leh dacwadda, lacagna ka qaato qofka baxsan muwakilkiisa rasmiga ah.
   - Kh. Haddii uu difaaciisa sharci ku saleeyo khiyaano ama uusan sharciga ilaalin.
   - d. Haddii uu ku kaco tartan marin-xumo leh oo aan u qalmin sharafta mihnadda Qareennimada, isla markaana lid ku ah mabaadi'da guud ee Ururka Qareennada, maamul-wanaagga iyo hab-dhaqanka wada-shaqeynta Qareennada.
   - r. Haddii uu ku kaco xil-gudasho-xumo ama dayacaad ay waxyeello ka soo gaarto muwakiliinta uu difaacayey ama uu wakiilka ka ahaa.
2. Habka loo qaadayo Dacwadaha Anshax-marinta waa sidan soo socota:-
   - b. Haddii ay soo gaarto Guddiga Anshax Marinta cabasho lid ku ah Qareen lagu eedeeyey xad gudub ku saabsan xil-gudasho la'aan, Guddigu wuxuu u qabanayaa maalin uu ku dhageysto dacwadda, muddo aan ka yarayn shan iyo toban (15) maalmood, waxaana loo dirayaa ogeysiis Qareenkaas iyo Hay'adda ama qofka ka soo dacwooday.
   - t. Guddigu waa inuu dhageystaa dacwadda Qareenka laga soo dacwooday

iyo jihada ama qofka soo dacwooday.

j. Guddigu wuxuu kaashan karaa hay'adaha Dawladda haddii loo baahdo si loo gaaro runta iyo caddaaladda.

3. Guddigu wuxuu awood u leeyahay in uu soo-saaro go'aanno anshax-marin oo ay kamid yihiin:-

b. Digniin afeed oo loo soo jeediyo Qareennka laga soo dacwooday.

t. Digniin qoraal ah oo la gaarsiiyo Qareenka laga soo dacwooday.

j. Ganaax lacageed oo la saaro Qareenkaas, ganaaxaas oo aan ka badnayn Shan boqol oo doolar ($500) ama Sh. So u dhigma.

x. Shaqada Qareennimada oo laga joojiyo Qareenka muddo aan ka badnayn hal (1) sano.

kh. Qareenka oo laga saaro xubinnimada Ururka Qareennada.

d. Go'aanka ka-saaridda Qareennka ee xubinnimada Ururka Qareennada waxay ku xiran tahay oggolaanshaha aqlabiyadda xubnaha Guddiga ruqsad bixinta iyo Anshax-marinnta qareennada, saddex-meelood labo (2/3) tirada guddiga.

r. Haddii go'aan ka-joojinta shaqada uu noqdo mid kama-dambays ah, looma oggola Qareenka shaqada laga joojiyey inuu wax ka difaaco Maxkamadaha Dalka hortooda iyo in uu ka faa'iidaysto xuquuqda kale ee xubinnimada Ururka Qareennada Puntland.

4- Hab-raaca rafcaan ka qaadashada go'aannada anshax-marinta Guddiga waa:-

b. Go'aanka anshax-marintu waa go'aan maamul, wuxuuna Qareenku xaq u leeyahay inuu cabasho uga qaato Maxkamadda Sare, muddo soddon (30) maalmood gudohood ah oo ka bilaabmaysa maalinta Qareenka la gaarsiiyey go'aanka anshax-marinta ee Guddiga.

t. Haddii ay dhacdo in cabasho laga qaadan-waayo go'aanka Guddiga, muddada loo cayimay ee ah soddonka (30) maalmood gudaheeda, go'aankaasi wuxuu noqonayaa kama dambays dhaqan-gal ah.

# CUTUBKA 5AAD
# URURKA QAREENNADA
## Qodobka 22-aad
## Shuruudaha Xubinnimada Ururka

1. Waxaa Ururka Qareennada xubin ka noqon kara :-
   b. Muwaadin Soomaaliyeed oo ka haysta shahaado sharci (Shareeco ama Qaanuun) jaamacad la aqoonsan yahay.
   t. Qof kasta oo doonaya inuu helo Ruqsadda Qareennimo oo buuxiyey shuruudaha.
   j. Qof kasta oo bixiyey khidmadda diiwaan-gelinta Ururka.

## Qodobka 23-aad
## Waajibaadka Xubnaha Ururka

1. Inuu dhawro Dastuurka, Shuruucda Dalka, Sharciga Qareennada iyo Xeer Hoosaadka Qareennada.
2. Inuu dhawro anshaxa iyo akhlaaqda xirfadeed, waajibaadka saaranna u guto, si sharciga waafaqsan.
3. Inuu u hoggaansamo go'aamada ka soo baxa mas'uuliyiinta Ururka heer kastaba ha ahaadeen.
4. Inuu qorsheyaasha iyo hawlaha Ururka u fuliyo si daacadnimo ku dheehan tahay.
5. Inuu ilaaliyo sirta, hantida iyo sumcadda Ururka.
6. Inuu u fuliyo shaqadiisa si caddaalad ah oo danta Ururku ku jirto.
7. Inuu si joogto ah u bixiyo qaaraanka Ururka, soona xaadiro kulamada iyo shirarka Ururka.

## Qodobka 24-aad
## Xuquuqda Xubnaha Ururka

1. Inuu wax doorto, lana dooran karo, loona magacaabi karo darajo kasta iyo guddi kasta oo Ururka ah.
2. Inuu helo kaarka aqoonsiga ee uu bixiyo Ururku.
3. Inuu helo tababarro iyo aqoon-isweydaarsiyada uu Ururku bixiyo.
4. Inuu si xor ah u soo bandhigi karo afkaartiisa soona jeedin karo talooyin ama dhaliilo la xiriira hawlaha Ururka.



ANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
E GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 25-aad
## Waayidda Xubinnimada Ururka

1. Xubinnimada Ururka waxaa lagu waayi karaa:-
   - b. Xubinta oo geeriyoota.
   - t. Xubinta oo xilkeeda gudan wayda.
   - j. Xubinta oo ku kacda falal lid ku ah jiritaanka Ururka ama jabisa Xeerka Ururka.
   - x. Haddii xubinnimada looga qaado go'aanka ka dhashay anshax-marin.
   - kh. Xubinta oo bixin wayda qaaraanka Ururka, Xubinnimada lagu waayo qaaraanka bixintiisa waa loo soo celinayaa, haddii uu iska bixiyo qaaraanka lagu leeyahay, waxaana loo raacin karaa ganaax uu xaddidayo Guddiga Fulinta.

## Qodobka 26-aad
## Doorashada Ururka

1. Guddoomiyaha, Guddoomiye Ku-xigeenka iyo Golaha Dhexe waxaa lagu dooranayaa shirweynaha Ururka.
2. Muddo Xileedka Guddoonka iyo Golaha dhexe ee Ururku waa saddex (3) Sano oo ka bilaabmaysa maalinta la doorto, waxaana dib loo dooran karaa hal mar oo kale.

## Qodobka 27-aad
## Qaab Dhismeedka Ururka

Qaab dhismeedka iyo haykalka Ururka Qareennada Puntland wuxuu ka kooban yahay:-

1. Golaha Dhexe.
2. Guddiga Fulinta oo ka kooban:-
   - b. Guddoomiyaha.
   - t. Guddoomiye-Ku xigeenka.
   - j. Xoghayaha Guud.

## Qodobka 28-aad
## Shirkad Sharci

1. Shirkad sharci waa shakhsi ama koox xirfadeed oo ka kooban qareeno bixiya adeegyo sharci oo kala duwan, door muhiim ahna ka qaata ilaalinta caddaaladda iyo sareynta sharciga.



XAFIISKA QAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND / STATE GENERAL SOLICITOR

2. Shirkadda Qareennadda ee bixisa adeegyada sharci waxay shati sannadle ah ka qaadanayaan Wasaaradda.
3. Qiimaha shatiga shirkadda qareennadda waa Boqol ($100) doolar, cusbooneysiintiisuna waa konton ($50) doolar ama Sh.So u dhigma, waxaana lagu shubayaa Khasnadda dawladda.

## Qodobka 29-aad
## Waajibaadka Shirkdaha Sharciga/ Qareenno

1. Shirkadaha sharciga ee ku diiwaan gashan xeerkan waa inay u hoggaansamaan heerarka ugu sareeya ee anshaxa xirfadeed iyo sharci ee mihnadooda.
2. Shirkadaha sharcigu waa inay ilaaliyaan sirta iyo mudnaanta dhammaan isgaarsiinta macmiilka,waa in aysan bixin wax macluumaad sir ah, iyadoo aan oggolaansho cad laga helin macmiilka, marka laga reebo amar Maxkamadeed.
3. Waa inay matalaad ku sifaysan karti iyo hawlkarnimo siiyaan macaamiishooda, sidoo kalena ilaalinaya mabaadi'da caddaaladda.
4. Waa inay xaqiijiyaan in dhammaan adeegyada sharciga ah ee ay bixinayso waafaqsan yihiin shuruucda iyo qawaaniinta Puntland, waana inay ka fogaadaan ku lug lahaanshaha wax kasta oo keeni kara iska hor imaad ama danaha isdiidan .
5. Shirkadaha sharcigu waa inay xafidaan diiwaannada dhammaan arrimaha macmiilka,si waafaqsan xeerkan iyo shuruucda Puntland.

## CUTUBKA 6-AAD
## QODOBBO GUUD
## Qodobka 30-aad
## Fal Dambiyeed

Qofkii ku hela Ruqsadda Qareennimo sifo baal-marsan sharciga, wuxuu galayaa fal-dambiyeed, haddii ay ku caddaato, waxaana lagu ciqaabayaa hal sano oo xarig ah ama ganaax lacageed oo aan ka yarayn Kun ($1000) doolar, kana badnayn labo kun ($2000) oo doolar ama Sh.So u dhigma.



XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 31-aad
## Ruqsadadaha La Bixiyey wax-ka-beddelka Xeerkan ka hor

1. Qareennada ku soo shaqeeyey Ruqsadihii lagu bixiyey xeerkan wax-ka beddelkiisa ka hor, waxaa laga dhaafayaa shuruudaha Ruqsad qaadashada ee ku xusan Qodobka 18-aad ee Xeerkan, waxayna xaq u leeyihiin cusboonaysiin ruqsad.
2. Qareennada ku soo shaqeeyey Ruqsadihii lagu bixiyey xeerkan wax ka beddelkiisa ka hor marka loo cusboonaysiinayo Ruqsadda, waxay bixinayaan lacagta cusboonaysiinta Ruqsadda ee ku cad Qodobka 18-aad faqradiisa 7-aad ee Xeerkan.
3. Guddiga Anshax-marinta iyo Ruqsad Bixinta Qareennimo marka uu samaynayo Cusboonaysiinta Ruqsadda Qareenka ee lagu sheegay isla Qodobkan faqradiisa 2-aad waa in uu hubiyaa dukumintiyada codsadaha Ruqsad cusboonaysiinta dalbaday.

## Qodobka 32-aad
## Xallinta Khilaafaadka Ururka

1. Haddii khilaaf soo kala dhexgalo maamulka Ururka waxaa lagu xalinayaa Ururka gudihiisa, haddii ururku xal ka gaari waayo waxaa loo soo gudbinayaa Wasaaradda Caddaaladda si ay u xaliso khilaafka jira.
2. Haddii ay Wasaaraddu wax xal ah ka gaari waydo khilaafka waxaa loo gudbinayaa Maxkamada Sare si ay go'aan uga soo saarto.

## Qodobka 33-aad
## Xeer-Nidaamiye

Guddoomiyaha Ururka Qareennadu isagoo la tashanaya Golaha dhexe ee ururka wuxuu soo saarayaa Xeer-hoosaadyo iyo Habraacyo lagu fulinayo Xeerkan.



XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 34-aad
## Burin

Waxaa la buriyey xeer, Xeer-hoosaad iyo wareegta kastoo fulineed oo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin xeerkan.

## Qodobka 35-aad
## Dhaqan-Galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.



QAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR